

# DIGNIIN KU SAABSAN AMARKA AMMAAN GELINTA EE MAXKAMADU SOO SAARTEYEE HALKAN KU LIFAAQAN

**FIIRO GAAR AH:** *Sharciga 10.03 waxa uu waajib ka dhigayaa in digniintan lagu lifaaqo bogga ugu koreeya ee amarrada ammaan-gelinta lagu lifaaqo digniintan sida ay qabaan sharciyada gobolka Ohio ee R.C. 2903.213 iyo 2903.214*  
*WAXAA LALA ISTICMAALI KARAA FOOMAMKA 10.03-B, 10.03-E, 10.03-F.*

## **DIGNIIN KU SOCOTA DACWEYSANAHA/EEDEYSANAHA**

Jabinta ammarka maxkamadda ee halkan ku lifaaqan waa dambi, oo ciqaabtiisu tahay xariq ama ganaax ama labadaba waxayna keeni kartaa in la qaato lacagtii damaanadda ahayd ee aad dhigtey si lagu sii daayo ama waxaa tikid laguugu siin karaa in aad hor istaagtey maxkamadda si ay u qudato hawsheeda.

Amarkan badbaadinta ah ee maxkamaddu soo saartey waxa uu dhaqangal ka yahay 50ta gobol, Degmada Columbia, dhulka ay qabiiladu degaan iyo dhulka mareykanka oo dhan ee ka soo horjeeda xadgudubka loo geysto dumarka sida ku xusan sharciga, 18 U.S.C. Qeybtiisa 2265. Jabinta amarkan waxa suurto gal ah in laguugu soo taago Maxkamadda dawladda dhexe oo aad ku mudato ciqaab.

Sida uu dhigayo amarka, waxaa laga yaabaa in aan laguugu ogaleyn in aad iibsato ama aad qaadato oo ay ka mid yihiin noocyada kala duwan ee qoryaha, bistooladaha iyo rasaastaba taaso waaqfaqsan sida uu qabo sharciga dawladda dhexe ee 18 U.S.C. Qeybtiisa 922(g)(8). Haddii aad wax su'aal ah ka qabto in sharciyadaas kuu diidayaan gudashada iyo haysashada hubka, waa in aad la tashataa qareen.

Maxkamadda oo kaliya ayaa beddeli karta ammarkan. Dacwoodaha/dhibanaha kuma siin karo ogolaansho aad ku jabiso amarkan. Haddii aad u dhawaato (aad tagto) meel uu joogo dacwoodaha/dhibanaha, xitaa haddii uu sidaa kaa codsado dacwoodaha waa lagu xirayaa. Waxa aad u bareertay khatar haddii aadan tixgelin DIGNIINTAN. Haddii aad dooneyso amarka wax laga bedelo weydiiso maxkamadda.

## **DIGNIIN KU SOCOTA DACWOODAHA/DHIBANAHA**

**Kuma bedeli** kartid erayo ama fal aad geysato sida uu amarkan u qoran yahay. Maxkamadda oo kaliya ayaa u ogolaan karta dacweysanaha/dambiilaha inuu kula soo xiriiro ama ku soo noqdo halka aad degan tahay. Labada dhinacna midna **ma bedeli** karo amarkan iyada oo aan amar qoran laga helin oo lagu bedelayo.

## **OGEYSIIS KU SOCDA DHAMAAN SARAAKIISHA IYO HAY'ADAHA SHARCI FULINTA**

Amarka halkan ku lifaaqan waa mid ka dhaqangalaya dhulka oo dhan. Amarka madaniga ama kan fal dambiyeedka kuu doono ha ahaado oo aad jabisaa waa dambi sida uu qabo sharciga R.C. 2919.27. Saraakiisha sharci fulinta ee awoodda u leh in ay dadka xiraan sida uu qabo sharciga R.C. 2935.03 ee jabinta sharciyada u degsan gobolka Ohio waxaa waajib ku ah in ay dhaqan geliyaan amarka ammaan gelinta ee maxkamaddu soo saartey sida uu qabo sharciga R.C. 2919.26, 2919.27 iyo R.C. 3113.31. Haddii ay jirto sabab aad ku aaminto in dacweysanaha/eedeysanaha uu jabiyey amarkii kala amaangelinta ee maxkamadda, waxaa uu sharcigu Ohio ee lambarkiisu yahay R.C. 2935.03 qabaa in aad xirto dacweysanaha/dambiilaha ilaa maxkamaddu amar ka soo saareyso. Sharciyada dawladda dhexe iyo kuwo gobolkuba ma ogola in aad lacag ku bixiso sidii loo dhaqan gelin lahaa amarka maxkamadda.

### FORM 10.03-H WARNING CONCERNING THE ATTACHED PROTECTION ORDER